




Visit
DTV.gov

U-GUDBIDDA TV-GA DHIJITAALKA (DTV)

Maxaad u baahantahay in aad ka ogaatid DTV-ga



Waa maxay u-gudbidda telefishinka dhijitaalka (DTV)?

Wakhti xaadirkan idaacado badan ayaa baahiya naqshadaha telefishinka ee dhijitaalka iyo anaaloogga. Wixii ka-dambeeyaa Febraayo 17, 2009-ka, idaacadaha awoodda buuxda ee baahinta telefishinka waxay ku-baahinayaan naqshadda dhijitaalka keliya. U-gudbidda DTV-ga waxay saamayn doontaa kuwa daawada baahinta telefishinka bilaa lacata (ee ay soo jiidaan anteenoyinka saqafyada gurayaha la sudho). Haddii aad daawanaysid barnaamijyada telefishinka bilaa lacagta ee hawda la-soo-mariyo oo aad ku-daawanaysid naqshada anaaloogga, waxaa waajib kugu ah in aad inta ka-horaysa Febraayo 17, 2009.

Maxay tahay sababta keentay in isbeddelka?

Sharciga Federaalku wuxuu dhigayaa in loobaahanyahay in uu isbeddelkaasi oo hawada u firaaqaynaya mawjadaha booliska, dab-damiska, iyo isgaadhsiinta hawlaha gurmadka ee naf-badbaadinta, uu noqda mid keena in barnaamijyada baahintu ay noqdaan kuwo ay sawirradoo iyo codkoodu yihii kuwo ka tayo fiican sidii hore, xulsho barnaamijyo badan laga-dhex xulan karo leh isla-markaana fududaynaya in la-bixiyo adeegyada bilaa-xadhigga ee baahinta ganacsiga.



Si aan diyaar u noqdo maxaa la-iiga baahanyahay inaan sameeyo?

Waxaa haysataa saddex fursadood:



Waxaad TV-gaaga ku-xidhi kartaa sanduuqa anaaloogga u beddela dhijitaalka.

Sanduuqyada anaaloogga dhijitaalka u beddela waxaa laga heli karaa dukaanada, waxaa midkii la-siiyaa qiima dhan \$40 illaa \$70. Si kharshkaa lagaaga caawiyo dawladdu waxay qoys welba siinaysaa laba kaar oo uu mid-weliba yahay \$40. Si aad xog dheeraad ah u heshid, waxaad eegtaa shabkadda www.DTV2009.gov ama waxaad wacdaa taleefonka 1-888-388-2009 (codka) ama 1-877-503-2634 (TTY). Waxaa kale oo intaa-dheer, haddii aad uu anaaloogaagu si wanaagsan u qabanayo sawirrada jaanaalada 2-51, uma baahanaysid in aad anteeno cusub yeelatid. **Ama**



libso telefishin cusub oo dhijitaal ah (mid leh mawjadaha dhijitaalka lagu helo oo gudihiisa ku-rakiban).

Si aad u heshid baahinta telefishinka dhijitaalka ah khasab kuguma ahaa in aad yeelatid TV-ga aad u sareeya (HDTV), keliya waxaad u baahantahay telefishinka dhijitaalka ah (. ama mid lagu xidhay sanduuqa anaaloogga u beddela dhijitaalka). Waxaa kale oo intaa-dheer, haddii aad uu anaaloogaagu si wanaagsan u qabanayo sawirrada jaanaalada 2-51, uma baahanaysid in aad anteeno cusub yeelatid. **Ama**



Waxaad iska-diiwaan-gelisaa adeegga TV-ga lacagta laga-bixiyo.

Haddii aad iska-diiwaangelisid telefishinka lacagta laga-bixiyo ee sida keebilka (ka-xadhkaha), waxaa waajib ah in aad la-xidhiidhid macmiilka aad adeegga ka helaysid, si aad u ogaatid waxyaalaha iyo qalabka aad u baahantahay. Waxaad xusuusnaataa in anaaloog-kasta oo aan ku-xidhnayn adeegga telefishinka lacagta laga-bixiyo oo gurigaaga kaga baahan doono sanduuqa anaaloogga dhijitaalka u beddela.

Si aad xog-dheeraad ah u heshid: